



**Xafiiska Kormeeraha Guud ee Waxbarashadaa Dadweynaha (OSPI)
Ra'yi-ururinta Luqadda Guri**

Magac Arday:		Taariikhda:
Taariikh Dhalasho:	Lab/Deddig:	Heer Fasal:
Foomka Waxa Buuxiyay:		
Magaca Waalid/Masuul _____ Waxa Isku Ahaan araday _____		
Saxiixa Waalid/Mas'uul _____		
Haddii la heli karo, luqaddee ayaad doorbideysaa inaad ku hesho farriimaha ka socda dugsigay?		

Miyuu ilmahaagu ku helay taageerada horumarka luqadda Ingiriisiga iyada oo loo maray Barnaamijka Waxbaritaanka Laba-Luqaddaha Ku-meelgaar dugsigii ugu dambeeyay ee ilmahaagu u wax ka baranayay? Haa__ Maya__ Ma Garanayo__		

1. Waddankee ayuu ku dhashay ilmahaagu?	_____
2. Luqadde ayuu ilmahaagu markii ugu horreysay bartay inuu ku hadlo?*	_____
3. Luqadde ayuu <u>ILMAHAAGU</u> inta ugu badan ku isticmaalaa guriga?*	_____
4. Luqaddee(luqadahee) ayay <u>waalidiintu/mas'uulku</u> badiyaa markaad la hadleysa ilmahaaga?	_____ _____
5. Cunugaada, marna, waxbarasho rasmi* ah ma ku soo qaadayay dibadda Mareykanka? (Xanaano - darajada 12 th) _____ Haa _____ Maya "Waxbarashada rasmiga" kuma jiraan xeryaha qaxootiga ama barnaamijyada kale ee aan la aqoonsanayn lana siiyo caruurta.	Hadday haa tahay, maxaa luqad(do) ah ee lagu siiyay waxbarashada? _____ Illaa immisa bilood?? _____
6. Goormaa ugu horayntii ilmahaaga la daray dugsi ku yaal Maraykanka? (Dugsiga barbaarinta- fasalka 12 ^{aad})	_____ Bil Maalin Sanad

***WAC 392-160-005:** "Luqadda hore" micnaheedu waa luqadda u ardaygu badiyaa isticmaalo (taasi ma aha sidoo kale inay yihiin waalidiinta, mas'uuliyiinta, ama kuwa kale) ku hadalka goobta u ardaygu ku noolyahay.

Note to district: A response of a language other than English to question #2 OR question #3 triggers ELL placement testing.

Ujeedada Wareysiga Luqadda Guriga

Wareysiga Luqadda Guriga (Home Language Survey) waxaa la siiyaa *dhamaan* ardayda lagu qoro dugsiyada Washington. Macluumaadka soo socda waxay kugu kaalmeyaan in aad ka jawaabtid qaar ka mid ah su'aalaha laga yaabo in aad ka qabtid foomkaan.

Maxay tahay ujeedada Wareysiga Luqadda Guriga?

Ujeedada ugu muhiimsan ee laga leeyahay Wareysiga Luqadda Guriga waa in lagu aqoonsado ardayda laga yaabo in ay xaq u leeyahiin taakuleyn si loogu kaalmeeyo horumarinta aqoonta luqadda Ingiriisiga ee loo baahan yahay si ay ugu guuleystaan fasalka, kuwaasoo laga yaabo in ay xaq u yeeshaan adeegyo kale. Waxaa muhiim ah in si sax ah loo qoro macluumaadkaan bacdamaa ay saameyn karaan xaq ardayda u leeyahiin adeegyada ay u baahan yihiin si ay ugu guuleystaan dugsiga. Waxaa dhici karto in loo baahdo in laga qaado imtixaan si loo ogaado haddii loo baahan yahay kaalmo dheeraad ah xagga barashada iyo aqoonta. Ardayna laguma meeleyn doono horumarinta luqadda Ingiriisiga taasoo ku saleysan jawaabaha uu ka bixiyo foomkaan oo keliya.

Maxay tahay sababta aad u weydiineysid luqadda kowaad uu ku hadlo ardayga iyo luqadda (luqadaha) laga isticmaalo guriga?

Labada su'aal ee ku saabsan luqadda ardayga waxay nagu kaalmeyaan in aan ogaano:

- haddii cunugaada uu xaq u yeelan karo kaalmo xagga barashada Ingiriisiga, iyo
- haddii loo baahan yahay in shaqaalaha dugsiga la socdaan luqadaha kale uu ardayga isticmaalo inta uu joogo guriga.

Waxaa dhici karto in luqadda uu marka kowaad bartay cunugaada in ay ka duwan tahay luqadda uu cunugaada iminka u isticmaalo isgaarsiinta inta uu guriga joogo. Jawaabaha laga bixiyo labadaan su'aal waxay dugsiga ku kaalmeyn doonaan in uu tababarka ku habboon siiyo baahida uu ardayga qabo iyo kaalmo xagga baahida isgaarsiinta ee laga yaabo in ay soo baxdo. Waxaa dhici karto in ardayda horay u soo baratay luqad aan ahayn Ingiriisi in ay xaq u yeeshaan kaalmo dheeraad ah. Waxaa dhici karta in xattaa ardayda si wanaagsan ugu hadasha Ingiriisiga in ay u baahan yihiin kaalmo xagga horumarinta aqoonta luqadda loo baahan yahay si loo guuleysto.

Maxaad u weydiisay meesha ardayga ku dhashay?

Macluumaadkaan wuxuu dugsiga dagmada iyo gobolka ku kaalmeyaa in ay ogadaan haddii ardayga uu la kulmo sifeynta muhaajirka si loo helo maal gelinta federaalka. Tan waxaa lagu dabaqaa xattaa marka waalidiinta ardayga yihiin muwaadiniin Mareykan ah labadaba, balse marka ardayga ku dhasho dibadda Mareykanka. Lama isticmaalo foomkaan si loo aqoonsado ardayda laga yaabo in aysan haysanin warqadaha lagu daggo waddanka.

Maxay tahay sababta aad u weydiisay waxbarashadii la soo dhaafay ee ardaygeyga?

Macluumaadka ku saabsan waxbarashada ardayga waxay kaalmo ka geysataan hubinta in la tixgeliyo waxbarashada ardayga, gudaha iyo dibadda Mareykanka, marka la soo qaado talooyinka la xariira ka-qeybgalka barnaamijyada iyo adeegyada dagmada. Waxbarashadii hore ee ardayga waa muhiim si loo ogaado haddii ardayga uu gaaro horumar ku filan xagga heerarka gobolka taasoo ku saleysan waxbarashadoodi hore.

Waad ku mahadsan tahay bixinta macluumaadka loo baahan yahay xagga Wareysiga Luqadda Guriga. La xariir dugsiga dagmadaada haddii aad qabtid su'aalo dheeraad ah oo ku saabsan foomkaan ama adeegyada laga heli karo dugsiga cunugaada.